



# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## HAY'ADDA SHAQAALAH DAWLADDA

# 2022

CSC Annual Report



Warbixinta Sannadeedka Waxqabadka  
Hay'dda Shaqaalaha Dawladda ee  
2022

## TUSMADA

1.	Hordhac .....	1
1.1	Ujeeddooyinka ay u aasaasantahay Hay'adda Shaqaalaha dawladdu.....	1
1.2	Himilada (VISION).....	1
1.3	Hiigsiga (MISSION) .....	2
1.4	Qorshaha istiraatijiyadda 5ta sano ee HSHD 2020-2024.....	2
2.	Faahfaahinta Wax qabadyada HSHD .....	2
2.1	Shaqaalaysiinta iyo Xulista shaqaalaha dawladda .....	2
2.2	Barnaamijska Shaqo qaran .....	4
2.2.1	Abuurida faylasha shaqo qaran dufaci 3aad.....	4
2.3	Shaqaalaha la dalacsiiyay.....	5
2.4	Shaqaalaha la badalay .....	5
2.5	Siyaasadda Daadejinta Derajooinka Shaaqalaha Dawladda .....	5
2.6	Tababarrada loo sameeyay shaqaalaha dawladda .....	8
2.6	Deeqaha waxbarasho ee shaqaalaha dawladda la siiyay sannadkii 2022.....	13
2.7	Nadiifinta xogta Xaashida shaqaalaha ee Serverka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda... <td>14</td>	14
2.8	Xog-Nadiifinta Xogta Shaqaalaha Dawladda .....	14
2.9	Daraasadda Casriyayna Nidaamka Kaydinta Iyo Maamulka Xogta Shaqaalaha Dawladda (HRMIS).....	15
2.10	Samaynta nidaamka hawl maalmeelka lagu maamulo - (Task Management system). <td>16</td>	16
2.11	Warbixinta Qaybta Dabagalka Iyo Qiimaynta Shaqaalaha Dawladda.....	17
2.12	Warbixinta Waxqabadka Kobcinta Xafiisyadda .....	18
2.13	Warbixinta Qaabdhismeedka iyo qeexida mas'uuliyadaha ee shaqaalaha dawladda; .	18
2.14	Warbixinta hawlgabka iyo xaqsinta shaqaalaha dawladda .....	19
2.15	Dar-dar galinta dhamaystirka iyo dhaqan-galinta Xeerka Shaqaalaha dawladda (Xeer Lr.97/2022 ).....	21
2.16	Xal-u-helida Cabashooyinka Shaqaalaha dawladda si waafaqsan Xeerarka dalka.....	23
2.17	Sugidda Is-waafajinta Xeerarka dalka iyo heshiisyada lala galayo shirkadaha (Consultancy companies) .....	23
2.18	Talo-bixino Sharci.....	23
2.19	Anshaxmarinta shaqaalaha dawladda.....	23
2.20	Warbixinta Kaydka xogta Shaqaalaha Dawladda .....	25
2.20.1	Wasaaradaha Iyo Haay'ddaha Xogta Shaqaalaha Soo Gudbiyey .....	25

2.21 Shaqaalaaha la diiwaan galiyey sanadka 2022.....	25
2.22 Liiska Darajo Badelka Wasaaradaha Iyo Ha'yadaha Dawladda 2022.....	28
3. Gunaanad.....	28

## **1. Hordhac**

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waa mid ka mid ah Hay'adaha Dastuuriga ah ee madaxa bannaan ee Qaranka JSL, iyada oo waajibaadkeedana ay ka mid yihiin:

- In la abuuro jawi suurtageliya in Adeegyo Waxtar iyo Tayo sare leh lagaadhsiiyo Guud ahaan Shacabka reer Somaliland
- Aasaasidda iyo Abuurista Shaqaale Qaran oo Fir-fircoo
- Kor uqaadidda Aqoonta, Xirfadaha iyo beddelidda Hab-dhaqanka Shaqaalaha Dawladda JSL si loo gaadhsiiyo guud ahaan Shacabka reer Soomaliland adeeg hufan waxtarna u leh.

### **1.1 Ujeeddooyinka ay u aasaasantahay Hay'adda Shaqaalaha dawladdu**

Sida ku cad Dasturka Qaranka JSL, ujeeddooyinka ama waajibaadyada ay u igmantahay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waa kuwan hoos ku xusan:

- Horumarinta Siyaasaddaha Shaqaalaha Dawladda
- Shaqaalaysiinta, Dallacsinta, Hoos udhigidda iyo Anshax-marinta Shaqaalaha Dawladda
- Qabashada iyo Qiimaynta Imtixaanno Daah-furan
- Kor-joogtaynta Bixinta Adeegyada Xarumaha/Xafiisyada Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda iyo
- Talo ka siinta Madaxwaynaha Arrimaha Khuseeya Adeegga Dadwaynaha ee ay bixiyaan Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay sidoo kale Masuul ka tahay diyaarinta iyo soo gudbinta Mushaharaadka Shaqaalaha Dawladda iyo Faa'iidooyinka kale ee la hal maala.

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay ka hawlgashaa Xafiisyana ku leedahay Dhammaan Xarumaha Gobollada JSL ee Saaxil, Awdal, Tog-dheer, Sool iyo Sanaag.

### **1.2 Himilada (VISION)**

In Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ay noqoto mid si caalamiya loogu aqoonsado xarun sharafeedka bixisa heerka ugu sarreeya ee adeegga dadweynaha kaas oo ay bixinayaan xirfadlayaasha, khubarada iyo cududda shaqaalaha ee dalkooda jecel.

### **1.3 Hiigsiga (MISSION)**

In la tayeyyo adeegga shaqada iyo shaqaalaha dawladda, xidhiidhka shaqaalaha, hoggaanka, horumarinta hay'adaha dawladda kuwaas oo joogtaynaya isla markaana kor u qaadaya adeegga dadweynaha ee Jamhuuriyada Somaliland.

### **1.4 Qorshaha Istiraatijiyyadda Shanta sanno ee HSHD 2020-2024**

Qorshaha Istaraatijiyyadeed ee shanta sanno waxa uu si habsami leh u hubinayaa in Barnaamijka Dib-u-habaynta Adeegga Dadweynaha iyo Shaqaalaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ay u gudanayaan Waajibaadkooda Shaqo sidii ugu habboonayd. Sidoo kale Qorshaha Istaraatijiyyadeed ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa uu si cad u qeexayaa Jihada iyo wax qabadyada Shanta Sannadood ee soo socda ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, isaga oo ka jawaabaya Baahiyaha Adeeg ee Shacabka Somaliland. Ujeeddooyinka laga leeyahay istaraatiyyadda waxa ka mid ah:

1. Xoojinta maamulka, hoggaaminta iyo awoodda maamulka ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah.
2. In la dhisoo maamulka aqoonta iyo nidaamka maaraynta cilmiga ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda
3. Si ay u soo jiidato, qorto una sii haysato shaqaale xirfad sare leh oo ka tirsan Shaqaalaha Dawladda.
4. In la siiyo shaqaalaha rayidka ah fursadaha iyo xeeladaha awoodda iyo horumarinta shaqada.
5. In la kordhiyo waxqabadka iyo wax soo saarka shaqaalaha rayidka ah si loo horumariyo adeeg bixinta
6. In la horumariyo lana hirgeliyo xeerarka iyo shuruudaha adeegga iyo u soo jeedinta madaxweynaha ee arrimaha la xidhiidha hawlaхаas.

### **2. Faahfaahinta Waxqabadyada Hay'adda Shaqaalaha Dawladda**

#### **2.1 Shaqaalaysiinta iyo Xulista shaqaalaha dawladda**

Waaxda shaqaalaysiinta iyo dallaciintu iyada oo fulinaysa xeerka shaqaalaha dawladda, xeer Lr.97/2022 iyo siyaasadda shaqaalaysiinta waxa ay dejisay isla markaana horumarisay in la shaqaaleeyo lana hayo shaqaale aqoon iyo xirfad sare u leh shaqada dawladda.

Haddaba hay'adda shaqaalaha dawladdu waxa ay sannadkii 2022 shaqaalaysiisay tiro dhan 647 qof, kuwaas oo 227 ka mid ahi haween yihiin halka 420-ka kalena ay rag yihiin sida ku cad Jaantuskakan hoose:

<b>Shaqaalaysiinta oo ku salaysan Darajada</b>				
<b>Darajada</b>	<b>Dheddig</b>	<b>Lab</b>	<b>Wadarta</b>	<b>Boqollayda</b>
A	40	106	146	<b>23%</b>
B	79	140	219	<b>34%</b>
C	29	128	157	<b>24%</b>
D	78	46	124	<b>19%</b>
<b>Wadarta Guud</b>	<b>227</b>	<b>420</b>	<b>647</b>	<b>100%</b>

*Jaantuska Iaad*

Jaantuskakan sare waxa uu muujinaya tirada shaqaalaha la shaqalaysiyyay sannadkii oo loo kala saaray lab iyo dheddig iyo darajooyinkooda. Shaqaalahan ayaa lagu meeleyey Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladda si kor loogu qaado aqoonta iyo wax soo saarka shaqaalaha dawladda.

Waxa imtixaan laga qaaday isla markaana la buuxiyay dhamaan kaalmihii shaqo ee ka bannaanaaday goobaha shaqo ee xafiisyada dawladda, iyada oo la waafajinayo siyaasadda iyo xeerka shaqaalaha dawladda.



*Imtixaankii laga qaaday shaqaalihii la shaqalaysiyyay sannadkii 2022-ka*

Hay'adda shaqaalaha dawladdu iyada oo fulinaysa xeerka shaqaalaha xeer lr.97/2022 iyo habraacyadda shaqaalaysiinta waxa ay hubin iyo imtixaan qaadis ku samaysay 261 kaalmo shaqo oo isugu jira 206 kaalmood oo ay u tartameen shaqaalaha ku-meel gaadhka ah ee wasaaradda caafimaadka JSL, kuwaas oo heerka aqoontooda ay ugu hoosayso diploma. Halka 55-ka shaqaale ee kalena loo sameeyay qiimayn iyadda oo loo raacayo nidaamka xeerku jideeyey.

Haddaba boosaskan kaalmo shaqo ayey hay'adda shaqaalahu dawladdu u qorshaysay in loo ja-jabiyo dhammaan goobaha caafimaad ee gobollada iyo degmooyinka dalka oo kala ah, 6 gobol iyo 23 degmo, si loo wada gaadhsiiyo tirada yar ee miisaaniyadda loo hayo.



*Qaar ka mid ah Sawirada Imtixaanka shaqaalahu ku meel-gaadhka ah ee wasaaradda caafimaadka.*

## 2.2 Barnaamijska Shaqo qaran

Hay'adda shaqaalahu dawladdu waxa ay meelaysay sannadkii 2022 shaqaale dhan 1219 oo ku yimi siyaadda madaxweynaha qaranka JSL ee Shaqo Qaran, iyada oo sannadkii gudihiiisa la qaybiyyay dufcadihii 2aad iyo 3aad ee Shaqo Qaran. Shaqaalahu ayaa lagu meeleyey Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda si kor loogu qaado aqoonta iyo wax soo saarka shaqaalahu dawladda.



*Diiwaangelintii Dufcadaha 2aad iyo 3aad ee Shaqo Qaran*

### 2.2.1 Abuurista Faylasha Shaqo Qaran Dufcaddii 3aad

Xafiiska kaydka xogta shaqaaluhu waxa uu faylashooda abuuray dhammaan shaqaalahu dufcaddii 2aad iyo 3aad ee Shaqo Qaran ee Hay'adda Shaqaalahu Dawladdu soo diiwaangalisay.

## **2.3 Shaqaalaha la dallacsiiyay**

Hay'adda shaqaalaha dawladdu waxa ay dallacsiiin u samaysay 136 ka mid ah shaqaalaha dawladda, kuwaas oo loo dallacsiiyey derajoooyinka kala duwan ee Shaqalaha Dawladda. Sidoo kale waxa la bilaabay samaynta siyaasadda mushahar bixinta iyo qaabaynta darajoooyinka shaqaalaha dawladda (pay & grading policy) taas oo looga dan leeyahay in lagu horumariyo heerka aqooneed iyo xirfaddeed ee shaqaalaha dawladda iyada oo lagu kala saari doono siyaasadda iyo xeerka shaqaalaha dawladda.

## **2.4 Shaqaalaha La Beddelay**

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu iyada oo fulinaysa siyaasadda wareejinta shaqaalaha dawladda iyo habraaca shaqaalaha dawladda waxa ay sannadkii 2022 wareejin u samaysay shaqaale tiradoodu dhan tahay 78 qof.

## **2.5 Siyaasadda Mushahar Bixinta iyo Qaabaynta Darajoooyinka Shaqaalaha Dawladda**



Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu iyada oo kaashanaysa Mashruuca Baanka Adduunka waxa ay samaysay siyaasadda mushahar bixinta iyo qaabaynta darajoooyinka shaqaalaha dawladda. Barnaamijka ay HSHD ku hirgalinayso siyaasaddan ayaa waxa uu soo bilaabmay bishii November 2021, waxaanuu dhamaaday bisha December ee sannadkii 2022, taas oo lagu fuliyay muddo 13 bilood ah.

Wejigii koobaad ee diyaarinta siyaasadda waxa ka mid ahaa qaadashada shirkaddii hawshan qaban lahayd taas oo HSHD kala shaqaysay diyaarinta siyaasaddan. Khubarada shirkadda ka tirsan ee ka shaqeeyay siyaasaddan ayaa waxa ay ka koobnaayeen:

1. Khabiir ku takhasusay dib u habaynta mushaharaadka ahna hoggaamiyaha kooxda la taliyayaasha ah
2. Khabiir ku takhasusay Horumarinta Hay'adaha dawliga ah
3. Khabiir ku takhasusay dhaqaalaha iyo arrimaha shaqaalaha
4. Khabiir ku takhasusay xidhiidhka
5. Khabiir ku takhasusay dejinta mushaharaadka iyo faa'idooyinka kale ee shaqaaluuhu helaan

Sidoo kale waxa la taliye walba ku lammaana la taliye heer qaran ah kaas oo ka caawinayay fahamka deegaanka JSL iyo xaaladda dalka. Dhanka kale waxa la magacaabay guddi farsamo oo ka kala socda Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka iyo Wasaaradda Shaqada, Arimaha Bulshada iyo Qoyska. Gudidaas farsamo oo ka koobnaa sagaal xubnood ayaa ku matalayay dawladda JSL muddadaas 13 bilood ah oo kala shaqaynayay la taliyayaasha caalamiga ah diyaarinta siyaasaddan.

Isla wajiga koobaad ee hawhsan ayaa waxa lagu qeexay ujeeddada laga leeyahay siyaasadda, habka loo raacay diyaarinta siyaasadda, qaybaha kala duwan ee loo maray diyaarinta siyaasaddan, iyo qorshaha guud ee shaqada.

Wajigii labaad ee diyaarinta siyaasadda waxa qiimayn guud iyo lafagur lagu sameeyay qaab-dhismeedka mushaharaadka shaqaalaha ee hadda shaqeeya, isla markaana waxa la darsay xeerarka iyo siyaasadaha kala ah:

- ◆ Xeerkii hore ee shaqaalaha Dawladda xeer Lr. 7/96
- ◆ Xeerka dhawaan la ansixiyay ee shaqaalaha dawladda, xeer Lr. 97/2022, (kaas oo ahaa qoraalka ugu muhiimsan ee salka u ahaa diyaarinta siyaasadda mushahar bixinta iyo qaabaynta darajooyinka shaqaalaha dawladda)
- ◆ Habraacyada iyo siyaasadaha shaqaalaha dawladda (16-ka habraac ee lagu maamulo shaqaalaha dawladda)
- ◆ Istaraatijiyyadda dib u habaynta shaqaalaha dawladda
- ◆ Warbixinta madax taabashada shaqaalaha dawladda

- ◆ Habraaca lagu maamulo xaashida mushahar bixinta
- ◆ Habraaca lagu maamulo baadhidda xaashida mushahar bixinta
- ◆ Qorshaha Horumarinta Qaranka
- ◆ Xaashida mushahar bixinta ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda
- ◆ Istaatikada shaqaalaha iyo mushaharaadkooda
- ◆ Qaab-dhismeedka iyo Qeexidda Masuuliyadaha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda

Wejigii 3aad ee diyaarinta siyaasadda waxa qiimayn ballaadhan oo gobollada dalka oo dhan ah laga sameeyay xaaladda maaliyadeed ee JSL, taas oo la eegay dakhliga qoys iyo kan shakhsii ee bulshada ku dhaqan JSL, iyada oo taasna la barbar-dhigay dalalka jaarka ah.

Wajigii 4aad iyo 5aad ee diyaarinta siyaasadda waxa lagu eegay shaqo qeexidaha shaqaalaha dawladda, waxaana la diyaariyay habka loo marayo marka la qaybinayo shaqooyinka sidoo kale. Waxa shaqo qeexyo loo diyaariyay qaar ka mida ah boosaska shaqo ee ka jira W&HD, iyada oo ugu yaraan hal shaqo qeex oo muunad ah loo sameeyay boos walba, kuwaas oo isugu jira boosas maamul iyo qaar xirfadeed intaba. Intii lagu jiray wajigii 5aad ee hawshan waxa boosaskaas loo sameeyay derajada ay ku mushahar qaadan doonaan. Wajigii 5aad waxa lagu soo bandhigay dhawr nooc oo ah qaab-dhismeedka la qaadan karo ee darajooyinka shaqaalaha.

Wajigii 6aad iyo 7aad ee siyaasadda diyaarinteeda waxa lagu soo jeediyay qaab (model) maaliyadeed iyo siyaasado la kala dooran karo oo salka ku haya xeerka shaqaalaha dawladda xeer (97/2022). Waxyaabaha lagu soo bandhigay wajigan waxa ka mid ahaa:

- ◆ Sidii loo fulin lahaa xeerka iyo habraacyada shaqaalaha dawladda
- ◆ Mushahar midaysan – Shaqooyinka isku midka ahi in ay yeeshaan mushahar/gunno isku mid ah
- ◆ Qaab-dhismeedka derajooyinka
- ◆ Mushaharaadka shaqaalaha oo lacag ah
- ◆ Qaab-dhismeedka mushaharaadka ee gudban
- ◆ Faa'iidooyinka iyo gunnooyinka shaqaaluhu helayaan
- ◆ Qaab-dhismeedka Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda
- ◆ Siyaasadda Qiimaynta hawlqabadka shaqaalaha
- ◆ Maamulka barnaamijka maaraynta hibada

Wajiga 8aad iyo 9aad ayaa waxa lagu diyaariiyay habraaca fulinta siyaadda iyo maaraynta isbeddellada derajooyinka shaqaalaha iyo sidoo kale habraaca lagu maamulayo mushaharka shaqaalaha dawladda iyo ugu dambayn qoraalka siyaasadda (Policy Paper) ee la horgayn doono golaha Wasiirrada JSL si ay u ansixiyaan.

## 2.6 Tababarrada Loo Sameeyay Shaqaalaha Dawladda

Iyada oo la raacayo siyaasadaha tilmaamidda iyo tusaalaynta la xidhiidha ee looga dan leeyahay dhiirri-galinta iyo kobcinta shaqaalaaha dawladda, waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladu tobararo tiradoodu dhan tahay 14 u qabteen shaqaalaaha dawladda, kuwaas oo looga gol lahaa kor u qaadista xirfadaha iyo aqoontooda.

Hay'adda shaqaaluhu waxa ay tababar laba cisho ah u qabatay Agaasime Waaxeedyada Cududda shaqaalaha ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha dawladda. Tababarkan oo loogu talagalay Xubnaha Agaasimayaasha Cududda shaqaalaha dawladda in lagu fahamsiiyo Xeerka shaqaalaha dawladda Xeer Lr.97/2022, kaas oo la ansixiyay bishii saddexaad ee sannadkii 2022.



*Sawirradii tababarka xeerka shaqaalaha dawladda*

Tababarkan waxa looga gol lahaa:

- In la fahansiiyo Agaasimayaasha Cududda shaqaalaha ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha dawladda Xeerka shaqaalaha dawladda, Xeer Lr.97/2022.
- In uu si cad u tilmaamo doorka ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ku leedahay maamulka shaqaalaha dawladda ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha kale ee dawladda.
- In la tibaaxo Waajibaadka shaqaalaha iyo Xuquuqda xeerku siiyay iyo sidoo kale muhiimadda ay leedahay ilaalinta Xuquuqda shaqaaluhi.
- Fahamsiinta guddiyada anshaxmarinta shaqaalaha dawladda ee hannaanka saxda ah ee loo maro anshaxmarinta shaqaalaha iyada oo la dhawrayo shuruucda dalka iyo xeerarka caalamiga ah.

Waxa tababa Indho-fur ah loo qabtay shaqaalaha cusub ee ku soo biiray hay'adda Shaqaalaha Dawladda. Tirada Shaqaale ee la siiyay Tababarku waxa ay dhamaayeen 16 shaqaale oo ka kala socday lixda Gobol ee ugu waaweyn Dalka, kuwaas oo ka koobnaa 12 rag ah iyo 4 haween ah.



*Tababarka indho-furka shaqaalaha cusub ee WHD*

Hay'adda shaqaalaha dawladdu iyada oo ka duulaysa muhiimadda ay leedahay sugnaanshaha Xogta Shaqaalaha Gobolladu waxa ay fulisay tababar ku saabsan Nidaamka Xog-kaydinta iyo Diyaarinta Gal-shakhsiyedyada Shaqaalaha Dawladda. Tababarkaas oo ku jiray qorshe

sannadeedkii 2022 waxa ka faa'idaystay Isu-duwayaasha Gobollada ee Wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladda.



#### *Tababarka isku-duwayaasha gobollada*

Waxa badhtamihii bishii 7<sup>aad</sup> ee sannadkii tababar indho-fur ah la siiyay qayb ka mid ah shaqaalaha Shaqo Qaran ee ku jiray dugsiga carbinta ee Derarweyne, kaas oo lagu baray Siyaasadda anshaxa (Civil service Code of conduct) iyo Xeerka shaqaalaha dawladda ee Xeer Lr.97/2022. Shaqaalahaan ayaa tiradoodu dhamayd 350 wiil.



*Sawirkani waxa uu tibaaxayaa markii tababarka la siinayay shaqaalahii Shaqo Qaran*

Tababar ku saabsan qaabka iyo hannaanka diyaarinta Qorshe-sannadeedka ayaa loo qabtay Agaasime Waaxeedyada Hay'adda Shaqaalaha Dawladda. Tababarkan ayaa awoodda lagu saaray hannaanka loo maro sameynta qorshe-sannadeedyada iyo qaabka ugu wanaagsan ee loo sameeyo qorshe ay fududdahay fulintiisa iyo dabagalkiisuba.



*Tababarka samaynta qorshe-sannadeedka*

Hay'adda shaqaalaha dawladu waxa ay Tababar ku saabsan "Hab-qoraalka Tolmoon ee Farta Soomaaliga" ay u qabatay shaqaalaha Hay'adda shaqaalaha, gaar ahaan Xoghaymaha iyo Xafiiska Xidhiidhka Dadweynaha, kaas oo ay bixinayeen khubaro muwaadiniin ah oo Hay'adda Shaqaalaha u qaabilsan Tababarrada.



Tababarkani waxa uu muhiim u yahay kor u qaadista hab qoraalka warbixinnada ku saabsan hawl-maalmeedka iyo waxqabadka Hay'adda Shaqaalaha iyo sidoo kale wanaajinta xidhiidhka Hay'adda Shaqaaluhu la leedahay hay'adaha iyo Wasaaradaha kale ee dalka iyo guud ahaan daneeyayaasha arrimaha shaqaalaha dawladda.

*Tababarka Hab-qoraalka toolmoon ee farta Soomaaliga*

- Hay'adda Shaqaalaha dawladdu waxa ay tababar u qabatay Agaasimayaasha Cudduda Shaqaalaha ee Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, kuwaas oo tiradoodu dhamayd

42 agaasime iyo agaasime ku-xigeen. Agaasimayaasha waxa lagu tababaray Shaqo qeexidda, shaqo hawleedyada, iyo Qiimaynta Mushaharaadka shaqaalaha.



*Tababarka shaqo qeexida iyo shaqo hawleedyada*

- Hay'adda shaqaaluhu waxa ay tababar lagu beegsanayey hannaanka loo fulinayo habraaca Maaraynta hawl-qabadka iyo Qiimaynta shaqada iyo shaqaalaha dawladda u qabatay Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda. Tababarkan waxa diiradda lagu saarayey hannaanka loo adeegsanayo foomamka qorshaynta, dib-u-eegista iyo Qiimaynta shaqada ee shaqaalaha dawladda.



*Tababaradda Habraaca Maaraynta H. Iyo Qiimaynta\_Shaqaalaha Dawladda*

Shaxdan hoos ku xusani waxa ay muujinaysaa faahfaahinta nooca tababarrada gaagaaban ee fulay sannadkii iyo tirada shaqaalaha qaataw tababarradan:

Nooca Tababarrada gaagaaban	Tirada Dheddig	Tirada Lab	Isu-geynta	Boqolleyda
Environment & Social Framework	7	7	14	3.9%
Hab-Qoraalka	4	14	18	5.0%
Induction Training	34	40	74	20.6%
Kobo System	1	7	8	2.2%
Leadership Management	1	17	18	5.0%
Monitoring And Evaluation	4	13	17	4.7%
Negotiation And Lobbying	1		1	0.3%
Pay And Grading Policy	21	98	119	33.1%
Payroll Cleaning	9	22	31	8.6%
Performance Management Training	6	7	13	3.6%
Record Management	2	12	14	3.9%
Tababarka Qaab Dhismeedka	4	12	16	4.5%
Time Management	3	13	16	4.5%
<b>Tirada Guud</b>	<b>97</b>	<b>262</b>	<b>359</b>	<b>100.0%</b>
Tababbarka indho furka shaqo qaran				<b>300</b>
<b>Tirada shaqaalaha guud ee helay tababbarrada gaagaaban</b>				<b>659</b>

*Jaantuska 3aad*

## 2.6 Deeqaha Waxbarasho Ee Shaqaalaha Dawladda La Siiyay Sannadkii 2022

Hay'adda Shaqaaluhu iyada oo kaashanaysa Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka, Guddida Tacliinta Sare iyo Mac-hadka Shaqaalaha waxa ay Deeq waxbarasho u direen Shaqaale Dhan 90 qof oo ka kala socday Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda.

- Waxaa deeq waxbarasho oo heerka labaad ee jaamacadda ah la siiyay shaqaale tiradoodu dhan tahay 15 qof, Deeqdaas oo uu bixiyay Mac-hadka Shaqaalaha Dawladda ee dalka Itoobiya, Ethiopia Civil Service University (ECSU), sida ku cad Jaantuskakan:

Master Programmes	Dheddig	Lab	Tirada Guud
<b>15</b>	<b>1</b>	<b>14</b>	<b>15</b>

*Jaantuska 4aad*

## **2.7 Nadiifinta Xogta Xaashida Shaqaalaha Ee Serverka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda**

Waxa dhawaan soo dhamaatay shaqadii ballaadhnyad ee ahayd nadiifinta xogta serverka hay'adda shaqaalaha dawladda iyada oo la is barbardhigay liiska Mushahar bixinta ee nidaamka FMIS-ka iyo Liiska Diwaanka shaqaalaha ee Serverka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.




*Waxaa lagu gudo jiray nadiifinta xogta shaqaalaha dawladda*

## **2.8 Xog-Nadiifinta Xogta Shaqaalaha Dawladda**






## Guulahaan laga gaadhay Xog-nadiifinta (Data Clearing)



## Dariiqaa-ka la marayey

4-tan waddo ayaanu u maraynay si loo nadiifiyo xogta shaqaalaha dawladda



## 2.9 Daraasadda Casriyaynta Nidaamka Kaydinta Iyo Maamulka Xogta Shaqaalaha Dawladda (HRMIS)

Waaxda ICT waxa ay door muhiim ah ka qaadatay xog ururinta Nidaamka casriga ah ee (Human Resource Management Information System - HRMIS) taas oo ay waaxdu kala shaqaynaysay shirkaddii loo qaatay in ay diyaariso nidaamkan oo laga diyaariiyay 3 qaybood oo kala ah:

- I. Qiimayn Qoto Dheer (Rapid Assessment)
- II. Qeexid Farsamo (Technical Specification)
- III. Qeexidda Agabka Nidaamka (System requirements specification)


Ka dib markii ay soo dhamaatay diyaarinta Daraasadda Casriyaysan ee Nidaamka Kaydinta iyo Maamulka Xogta Shaqaalaha Dawladda (HRMIS), waxaa loo gudbay sidii qorshuhu ahaa in la diyaariyo Shaqo-qeexista samaynta nidaamka.

Ka dib markii ay soo idlaatay wakhtigii shaacintu, waxa uu guddoomiyaha Hay'adda shaqaaluhu magacaabay guddida kala saarista shirkadaha soo xaraystay, waxaana isla markiiba la bilaabay kala saarista shirkadaha soo xaraystay, taas oo imika gabto ku dhaw.



## 2.10 Samaynta Nidaamka Hawl Maalmeelka Lagu Maamulo - (Task Management System)

Waaxda ICT ee hay'adda shaqaalaha dawladdu waxa ay samaysay nidaam sahlaaya in si fudud shaqaalaha loogu diro shaqooyin, halkaas oo si toos ah loogala soconaayo inta hawlood ee dhamaaday (Completed Tasks) ama inta socota (Progress tasks).



*Jaantuska 6aad*

## 2.11 Warbixinta Qaybta Dabagalka Iyo Qiimaynta Shaqaalaha Dawladda

Waxa kor joogtayn iyo kulamo badan lala sameeyay Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, waxaanay soo gudbiyeen qorshe-hawleedyadooda. Haddaba Jaantskakan hoos ku xusani waxa uu ina tusayaa Wasaaradaha iyo hay'adaha soo gudbiyay qorshe-hawleedyadooda:

S/N	Magaca wasaaradda/ hay'adda Dawladda	Nooca Dhukumentiga	Tir. Shaqaalaha	Faalo
1	Wasaaradda Degaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga	Qorshaha hawl-qabadka	30	Waxay ku soo dareen Qiimaynta hawl-qabadka 6dii bilood ee hore...
2	Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha	Qorshaha hawl-qabadka	25	
3	Wasaaradda Gaashaandhigga	Qorshaha hawl-qabadka		
4	Wasaaradda Ganacsiga	Qorshaha hawl-qabadka	190	
5	Wasaaradda Caddaaladda	Qorshaha hawl-qabadka	60	
6	Wasaaradda Arrimaha Gudaha	Qorshaha hawl-qabadka	5 dept.	Qorshaha waaxyaha keliya ayey so gudbiyen
7	Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga	Qorshaha hawl-qabadka	48	
8	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta	Qorshaha hawl-qabadka	182	
9	Wasaaradda Macdanta Iyo Tamarta	Qorshaha hawl-qabadka	70	
10	Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL	Qorshaha hawl-qabadka	63	
11	Hay'adda Barakayaasha iyo Qaxoontiga JSL	Qorshaha hawl-qabadka	152	
12	Hay'adda Dhawrista Tayada JSL	Qorshaha hawl-qabadka	31	
13	Hay'adda Qandaraasyada Qaranka JSL	Qorshaha hawl-qabadka	25	
14	Hay'adda Xuquuqal Insaanka Qaranka JSL	Qorshaha hawl-qabadka	50	
15	Mac-hadka	Qorshaha hawl-qabadka	20	

	Shaqaalaha Dawladda			
16	Hay'adda Duulista iyo Hawada	Qorshaha hawl-qabadka	214	

#### Jaantuska 7aad

Sida ku xusan Jaantuskaka sare, 9 Wasaaradood (**45.50%**) iyo 7 hay'adood (**40%**) ayaa soo gudbiyey foomamka qorshaynta hawl-qabadka shaqaalaha. Haddaba, xogtani waxa ay xaqiijinaysaa in Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu ay si wanaagsan u wadaan dhaqangelinta habraaca Maaratinta hawl-qabadka iyo Qiimaynta shaqaalaha, taas oo ay ka dhalanayso in la helo nidaam qiimayn iyo isla xisaabtan shaqo oo ku dhisan caddaalad.

### **2.12 Warbixinta Waxqabadka Kobcinta Xafiisyada**

Hay'adda shaqaaluhu waxa ay sannadkii samaysay xaqiijinta baahida shaqaale ee Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda, isla markaana waxa ay diyaarisay qorshaha qaybinta iyo qiimaynta dufcaddii 2aad ee shaqo qaran, iyada oo loo eegayo aqoonta iyo khibraddooda si loo geeyo wasaaradda / hay'adda ku habboon. Wuxuu sidoo kale la qabtay diyaarinta qorshaha isku jaangoyn ta shaqada iyo shaqalaaha ee Wasaaradaha hoos ku xusan:

S/T	Wasaaradaha
1	Wasaaradda Boosaha iyo isgaadhsiinta
2	Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka
3	Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta
4	Wasaaradda warfaafinta, dhaqanka iyo wacyigelinta
5	Wasaaradda Xadhiidhka Golaysha iyo Dastuurka

#### Jaantuska 8aad

### **2.13 Warbixinta Qaabdhismeedka Iyo Qeexidda Mas'uuliyadaha Shaqaalaha Dawladda**

Waxa sannadkii la diyaariiyay qorshaha dib u habaynta afar Hay'adood oo kala ah Komishanka Maamul Wanaagga, Hay'adda Qaxootiga, Guddida Qandaraasyada iyo Hay'adda Dhowrista Tayada, waxa loo sameeyay qaab-dhismeed ka turjumaya shaqada iyo masuuliyadaha ay u xilsaaran yihiin si ay gutaan waajibaadka qaranka ay u hayaan.

Sidoo kale waxa qiimayn lagu sameeyay lagana talo-bixiyay kaalmaha shaqo ee loo magacaabayay/ qaadanayay Wasaaradaha iyo Hay'adaha kala duwan ee dawladda, kuwaas oo tiradoodu dhamayd 20 kaalmood.

Waxa sidoo kale sannadkii Hay'adda Shaqaaluhu diyaarisay isla markaana dhamaystirtay shaqo qeexidda dhamaan shaqaalaha dawladda, iyada oo ay kala shaqeeyeen khubaro hawshaas takhsus u leh.

Tirada shaqaalaha ee shaqo qeexida loo sameeyay, iyo wasaaradaha loo sameeyay qaab-dhismeedka iyo waaxyaha la soo kordhiyay sannadkii waxa ay dhan yihiin **732**, sida ku cad Jaantuskaka hoose:

<b>Adeegyada qaab dhismeedka iyo dib u habaynta xafiisyada</b>	
Tirada shaqaalaha loo sameeyay tix raaca shaqo qeexyada	691
Wasaaradaha loo sameeyay qaab dhismeeska xafiiska (Organizational structure)	23
Tirada waaxyaha cusub ee loo abuuray Wasaaradaha & Hay'adaha Dawladda	16
Tirada waaxyaha loo wareejiyay Wasaaradaha kale	2

*Jaantuska 9aad*

## 2.14 Warbixinta Hawlgabka Iyo Xaqsiinta Shaqaalaha Dawladda

Hay'adda Shaqaaluhu waxa ay sannadkii xaqsiin u samaysay shaqaale tiradoodu dhan tahay 78, kuwaas oo isugu jira shaqaale shaqada laga joojiyay, shaqaale iskood uga tagey shaqada iyo shaqaale geeriyyoday, kuwaas oo dhamaan qaatay xaqoodii muddo sannadeedkii 2022.

<b>Nooca xaq siinta oo ku salaysan jinsi</b>		<b>Boqollayda</b>
<b>Wasaaradda/Hay'adda</b>	<b>Darajada</b>	
Hay'adda Duulista iyo Madaarrada	2	2.6%
Hay'adda Dhawrista Tayada	3	3.8%
Maxkamadaha	1	1.3%
Hay'adda ka hortagga Aafooyinka Dabiiciga ah iyo Kaydka Raashinka	1	1.3%
Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha	2	2.6%
Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah	1	1.3%

Wasaaradda Arrimaha Gudaha	1	1.3%
Wasaaradda Horumarinta Beeraha	2	2.6%
Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka	11	14.1%
Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha	1	1.3%
Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska	5	6.4%
Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyeynta	2	2.6%
Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka	1	1.3%
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda	2	2.6%
Wasaaradda Warfaafinta, Wacyi Gelinta iyo Dhaqanka	6	7.7%
Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska	21	26.9%
Wasaaradda Xanaannada Xoolaha iyo Kalluumaysiga	10	12.8%
Hay'adda Shaqaalaha Dawladda	6	7.7%
<b>Grand Total</b>	<b>78</b>	<b>100.0%</b>

Jaantuska  $10^{aad}$

Jaantskakan sare waxa uu muujinaya shaqaalaha xaqsiinta loo sameeyay iyo Wasaaradaha/hay'adaha ay ka kala socdeen.

- Tirada shaqaalaha hawlgabka ah ee ay Hay'adda Shaqaaluhu gacanta ku hayso oo tiradoodu dhan tahay **182** qof, ayaa ah kuwo si joogto ah u qaata xaqooda bil kasta, sida ku cad Jaantskakan hoose:

Xogta shaqaalaha Hawlgabka ah ee bil Walba yimaada								
	Wasaaradda/Hay'adda	Jinsiga		Derajad da				Total
		Rag	Dumar	A	B	C	D	
1	Maxkamadda sare	1	0			1		1
2	Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska	54	12	26	25	1	12	66
3	Wasaaradda Arrimaha Gudaha	17	1	3	9	5	1	18
4	Wasaaradda Horumarinta Biyaha	11	0	0	4	5	2	11
5	Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah	1	2		1	1	1	3
6	Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska	2	0	1	1			2
7	Wasaaradda diinta & Awqaafta	1	0	0	0	0	1	1
8	Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda	6	1		1	4	2	7
9	Hay'adda Shaqaalaha Dawladda	1	0	0	0	1		1
10	Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada	7	1	0	1	4	2	7
11	Maxkamadda Degmada	2		0	0		2	2
12	Wasaaradda Horumarinta	11	0	0	2	2	7	11

	Caafimaadka							
13	Hay'adda Duulista & Madaarrada	3	1	1	0	1	2	4
14	Hanti Dhawrka Guud	2	0	0	1	1		2
15	Wasaaradda Gaashaandhigga	2	1	1	1	1	1	4
16	Wasaaradda Caddaaladda	1	1		1		1	2
17	Madaxtooyadda	1	2		1	2		3
18	Wasaaradda Xanaannada Xoolaha iyo Kalluumaysiga	5	2	1	0	6		7
19	Hay'adda Qaxoontiga iyo Baarakacayasha	6	2	1	2	4	1	8
20	Hay'adda ka hor tagga Aafooyinka Dabiiciga ah iyo Kaydka Raashinka	1				1		1
21	Wasaaradda Horumarinta Beeraha	2	0	0	2	0	0	2
22	Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka	2	0	0	2	0	0	2
24	Wasaaradda Macdanta & Tamarta	1	1	0	0	1	1	2
25	Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyaynta	6	1	1	2	3	1	7
26	Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyada	7	1	0	5	2	0	8
	<b>Isu Geyn</b>							<b>182</b>

*Jaantuska 11<sup>aad</sup>*

Waxa kale oo la sameeyay xog ururin lagu ogaanayo dadka waayeelka ah ee shaqaynaya ee u baahan in la nasiyo, waxaana ka soo baxday xogtaas in 1200 oo shaqaale hawl gab ahi ay jiraan, kuwaas oo loo diyaariyay in ay sannadka 2023 galaan liiska hawl gabka.

## **2.15 Dardar Galinta Dhammaystirka Iyo Dhaqan-Galinta Xeerka Shaqaalaha**

### **Dawladda (Xeer Lr.97/2022 )**

Waxa badhtamihii bishii 2<sup>aad</sup> ee sanadkii 2022 soo gebagaboo bay dhammaystirka Xeerka Shaqaalaha Dawladda Xeer Lr.97/2022, kadib markii ay cod aqlabiyyad ah ku ansixiyeen Golaha Wakiillada JSL. Sidoo kale, waxa uu Madaxweynuhu saxeexay horraantii bishii 3<sup>aad</sup> iyada oo faafinta rasmiga ahna lagu dhaqan geliyay wareegtada Madaxeynaha.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



Xafiiska Madaxweynaha

Som: JSL/XM/WM/222-832/03/2022

Taas: 01/03/2022

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Xeerka Shaqaalaha Dawladda, Xeer Lr. 97/2022

Markaa Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaa Arkay: Qodebbada 38aad, 76aad, 77aad, 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaa Arkay: Go'anka Golaha Wakiliyada, Go'aan Lr. (GW/KF-02/929/2022), kuna taariikhaysan 16/02/2022, ee ansiista Xeerka Shaqaalaha Dawladda, Xeer Lr. 97/2022;

Waxaan soo-saaraaji

Wareegtadan oo lagu bashinayo Dhaqan-galka Xeerka Shaqaalaha Dawladda, Xeer Lr. 97/2022.

Allaa Mahad Leh

  
Muuse Biixi Cabdi  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



PL:344  
**RECEIVED**  
*01/03/2022*



## **2.16 Xal U Helidda Cabashooyinka Shaqaalaha Dawladda Si Waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda**

Sida ay nu ognahay waxa dhacda in shaqaalaha dawladu ay tabashooyin/cabashooyin qabaan markaa waxa ay Hay'adda shaqaalaha dawladdu xoogga saartay sidii shaqaalaha tabashada qaba loogu heli lahaa xal waafaqsan xeerarka dalka guud ahaan, gaar ahaanna Xeerka Shaqaalaha Dawladda.

Marka ay tabashadaasi soo gaadho Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, waxa ay Hay'addu u xil saartaa guddi xaqiico raadin ah oo ka gun gaadha cabashada shaqaalaha dawladda kuna soo dabbaala xaqiicda ay helaan xal waafaqsan xeerka shaqaalaha dawladda **Xeer Lr.97/2022**.

Sannadkii waxa soo gaadhay hay'adda shaqaalaha cabashooyin tiradoodu dhantahay **15** cabasho, kuwaasi oo hay'addu ka jawaab celisay kana talo-bixisay. Sidaas darteed, xal u helidda cabashada shaqaalaha dawladdu waxa ay wax weyn ka tartay kor uqaadista adeeg bixinta shaqaalaha dawladda si loo ilaaliyo xuquuqdooda uguna shaqeeyaan jawi dabacsan oo waxtar u leh tayada shaqada ay u hayaan Qaranka.

## **2.17 Sugidda Is-Waafajinta Xeerarka Dalka Iyo Heshiisyada Lala Galayo Shirkadaha (Consultancy Companies)**

Waxa socda Barnaamijka dib-u-habaynta shaqaalaha dawladda oo ka caawinaya Hay'adaha dawladda sidii loo tayayn lahaa shaqada iyo shaqaalaha dawladda, kuwaas oo loo qaato shirkado iyo khubaro takhasus u leh hadba shaqada la doonayo in la qabto. Haddaba marka ay Ha'adda Shaqaalaha Dawladdu heshiis la galayso shirkadaha, waxa heshiiska si qoto dheer diiradda loogu saaraa laguna sugaa in aanuu ka hor iman xeerarka dalka (**compliance check**).

## **2.18 Talo-bixinno Sharci**

Intii lagu jiray sannadkii 2022, waxa ay waaxda arrimaha sharciga ee Hay'adda Shaqaaluhu 24 talo bixin sharci siisay Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, iyada oo la raacayo dastuurka qaranka, xeerka kala-xadaynta nidaamka iyo awoodaha xukuumadda (Xeer Lr.71/2015), iyo Xeerka Shaqaalaha Dawladda (Xeer Lr.97/2022).

## **2.19 Anshax Marinta Shaqaalaha Dawladda**

Sida ay nu ka warqabno anshax marinta shaqaaluhu waa hannaan ka mid ah hannaannada lagu maareeyo shaqo-wanaagga iyo xoojinta adeeg bixinta (service delivery). Sidaas darteed, waxa ay waaxda sharcigu maamushay iskuna dubba ridday kiisas anshax marineed, iyada oo loo raacay Xeerka Shaqaalaha Dawladda Xeer Lr.97/2022, gaar ahaan qodobbadiisa 51-57.

Tirada kiisaska iyo go'aamada Sharciga ah ee laga qaatay waa sida ka muuqata shaxdan hoos ku xusan:

<b>Tir</b>	<b>Wasaaradda/Hay'adda</b>	<b>Tirada shaqaalaha</b>	<b>Go'aanka Guddida</b>
1.	Wasaaradda Warfaafinta	7	<ul style="list-style-type: none"> <li>• 1 Hal qof Shaqo ka saaris</li> <li>• 1 Digniin kama dambays ah + ka jaris bil mushaharkeeda</li> <li>• 1 Digniin kama dambays ah+ raali galin bixin public ah</li> <li>• 1 Digniin 1aad</li> <li>• 1 Digniin 1aad+ 7 cisho mushahar ka jaris</li> <li>• 1 Digniin kama dambays ah</li> <li>• 1Digniin kama dambays ah +mushahar ka jaris bil ah</li> </ul>
2.	Wasaaradda Isgaadhsiinta & Tiknoolajiyada	3	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Digniin kama dambays ah+ 7 cisho mushahar ka jaris</li> <li>• Digniin kama dambays ah</li> <li>• Digniin kama dambays ah</li> </ul>
3.	Hay'adda shaqaalaha dawladda	2	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Shaqo ka saaris</li> <li>• Digniin 1aad</li> </ul>
4.	Komishanka Xakamaynta Aids-ka	1	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Dingiin 1aad</li> </ul>
5.	Wasaaradda Diinta & Awqaafta	1	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Digniin</li> </ul>
6.	Wasaaradda Tamarta & Macdanta	3	<ul style="list-style-type: none"> <li>• 1 Digniin</li> <li>• 2 Shaqo ka saaris</li> </ul>
7.	Wasaaradda Duulista & Hawada	1	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Shaqo ka saaris</li> </ul>
8.	Hay'adda Mihnadlayaasha Caafimaadka	1	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Digniin</li> </ul>
9.	Hay'adda shaqaalaha dawladda	3	<ul style="list-style-type: none"> <li>• 1 shaqo ka saaris</li> <li>• 2 digiin 1aad</li> </ul>

<b>10.</b>	Hay'adda Qaxoontiga &Barakacyaasha	1	• Shaqo ka saaris
------------	------------------------------------	---	-------------------

*Jaantuska 12<sup>aad</sup>*

## **2.20 Warbixinta Kaydka Xogta Shaqaalaha Dawladda**

### **2.20.1 Wasaaradaha Iyo Haay'daha Xogta Shaqaalaha Soo Gudbiyey**

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxa ay masuul ka yahay dhammaan xogta shaqaalaha ee Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda. Hadaba Jaantuskakan hoose waxa uu inoo muujinayaan Wasaaradaha & Hay'adaha xogta shaqaalahooda la kaydiyay sannadkii 2022. Iyada oo loo raacayo nidaamka xog-kaydinta qaranka & hab-raacyada ay Hay'adda Shaqaaluhu u dejisay.

*Jaantuska 13<sup>aad</sup>*

### **2.21**

<b>S/N</b>	<b>Magaca Wasaaradda/Hay'adda</b>
1	Xafiiska Madaxtooyada
2	Wasaaradda Dhalinyarada & Ciyaaraha
3	Wasaaradda Shaqo-galinta, Arimaha Bulshada & Qoyska
4	Wasaaradda Horumarinta Ganacsiga & Dalxiiska
5	Wasaaradda Xidhidhka Golayasha & Arimaha Dastuurka
5	Hay'adda Duulista & Madaaradda
7	Wasaaradda Arimaha Gudaha
8	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha & Kalluumaysiga
9	Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacyaasha Qaranka
10	Hay'adda Xuquql Insaanka Qaranka
11	Wasaaradda Deeganka iyo Isbeddelka Cimilada
12	Wasaaradda Dastuurka iyo Xidhidhka Golayasha
13	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyi-gelinta

### **Shaqaalaaha La Diiwaan Galiyey Sannadkii 2022**

Tirada Wasaaradaha & Haay'adaha la diwaangaliyey sannadkii, kuwaas oo isugu jira shaqaale cusub iyo kuwa hore oo aan nidaamka diiwaan galinta hore u marin ayaa dhamaantood waxa ay mareen nidaamka maaraynta xogta shaqaalaha (record management and filling system), waxaanay ka kooban yihiin shaqaale cusub iyo shaqaale ka daahay diwaangalinta oo markii la samaynayay nadiifinta xaashida mushahar-bixinta ku soo baxay ama Baanku soo celiyay madaama oo aanuu xisaabta lacag ka qaadan karin qof aan ku jirin nidaamka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.

S/N	Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda	Tirada Shaqaalaha La Diiwaan Galiyey
1	Hay'adda Shaqaalaha Dawladda	16
2	Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda	44
3	Wasaaradda Waxbarashashada iyo Sayniska	75
4	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyi-gelinta	28
5	Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka	54
6	Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda	7
7	Wasaaradda Caddaaladda	6
8	Komishanka Xakameyntha HIV/AIDS	3
10	Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada	34
11	Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka	10
12	Wasaaraada Dastuurka iyo Xidhiidhka Golayasha	1
13	Maxkamadaha	9
14	Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska	4
15	Xeer-ilaalinta	8
16	Guddida Qandarasyada Qaranka	1
17	Komishanka Maamul Wanaagga	8
18	Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska	11
19	Komishanka Qaranka ee Tacliinta Sare	1
20	Hay'adda Duulista iyo Madaarrada	12
22	Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guriyaynta	8
23	Wasaaradda Arrimaha Gudaha	15

24	Wasaaradda Gaashandhigga	4
25	Wasaaradda Horumarinta Beeraha	26
26	Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha	25
27	Hanti-dhawraha Guud	0
28	Wasaaradda Tamarta Iyo Macdanta	1
30	Wasaaradda Diinta Iyo Awqaafta	37
31	Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo Kalluumaysiga	12
32	Mac-hadka Shaqaalaha Dawladda	7
33	Wasaaradda Horumarinta Biyaha	17
34	Madaxtooyada	31
35	Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka	4
36	Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga iyo Wershedaha	3
37	Hay'adda Dhawrista Tayada	1
38	Wasaaradda Arimaha Debedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah	5
39	Ururka Mihnadlayaasha Caafimaadka	2
40	Hay'adda Qaxootiga Iyo Barakacayaasha Qaranka	1
42	Hay'adda ka hortagga Aafooyinka Dabiiciga ah iyo Kaydka Raashinka	7
43	Komishanka Tamarta	10
44	Hay'adda Caymiska Qaranka	23
45	Komishanka Doorashooyinka Qaranka	6
46	Wasaaradda Horumarinta Reer Miyiga	27
47	Aagga Cashuuraha ka Caaggan (Freezone)	9
48	Hay'adda Cilmi-baadhistaa Beeraha	6
<b>Wadarta guud</b>		<b>619</b>

## **2.22 Gunaanad**

Warbixintani waxa ay koobaysaa waxqabadkii sannadka 2022 ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, waxaanay si faahfaahsan u qodobbaynaysaa hawl-qabadyadii sannadkaa qorshaysnaa intii la dhamaystiray ee guulaha la taaban karo laga gaadhay.

Waxyabihi ugu waaweynaa ee sannadkii 2022 la qabtay waxa ka mid ahaa;

- ✓ Wuxuu dufcadhi 2aad iyo 3aad ee shaqo qaran lagu meeleyay Wasaaradaha iyo Hay'adaha dawladda si kor loogu qaado aqoonta iyo wax soo saarka shaqaalaha dawladda.
- ✓ Wuxuu badhtamihii bishii 2<sup>aad</sup> ee sannadkii 2022 soo gebagaboobay dhamaystirka Xeerka shaqaalaha dawladda Xeer Lr.97/2022, ka dib markii ay cod aqalabiyad ah ku ansixiyeen Golaha Wakiillada Qaranka JSL, Madaxweynuhuna uu saxeexay, xeerkani waxa uu muuhiimad weyn u leeyahay guud ahaan Qaranka, gaar ahaanna shaqaalaha dawladda.
- ✓ Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu iyada oo kaashanaysa Barnaamijka Dib u Habaynta Shaqaalaha Dawladda waxa ay soo gaboo-gabaysay samaynta Siyaasadda Mushahar Bixinta iyo Qaabaynta Darajooyinka Shaqaalaha Dawladda.
- ✓ Hay'adda Shaqaaluhu iyada oo kaashanaysa Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka, Guiddida Tacliinta sare iyo Mac-hadka Shaqaalaha, waxa ay deeq waxbarasho u direen Shaqaale tiradoodu dhan tahay 90 oo ka kala socday Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda.



# 2022

CSC Annual Report